Helping Hand™ *Health Education for Patients and Families*

# Qiimeynta Dhallinta kujira Daryeelka ka baxsan Guriga

# Check-ups for Teens in Out-of-Home Placement (Somali)

Kurayda kujira daryeelka korrinta ama daryeelka xigtada bah waxay leeyihiin baahiyo gaar ah. Waxay baranayaan xirfadaha nolasha ee la xariira sida loo gaaro go'aanada gaarka ah. Kuraydu sidoo kale waxay walaacyo badan ka qabaan caafimaadkooda, xiriirka ay la leeyihiin saaxiibadood, iyo arrimahooda gaarka ah. Arrintaan waxaa loola jeedaa waxay go'aansan karaa sida qarsoodi looga dhigi karo balamaha baaritaankooda iyo daryeelkooda caafimaadka.

## Xog Guud oo ku saabsan Booqashada

- Kuraydu waxay buuxin doonaan foomamkooda gaarka ah. Foomamkaas waxaa ku qoran su'aalo wax looga waydiinaayo sida uu yahay dareenkooda, halista ay kujiraan in jirkooda laga ganacsado, galmo, aqoonsashada jinsiga, iyo isticmaalida daroogada.
- Si aan oga caawino dhallinta inay gacanta ku dhigaan daryeelkooda caafimaadka, waxaan ula kulanay si gaar ah si aan ogala hadalno dareenkooda iyo isbadel kasta oo ay isku arkeen, isticmaalida daroogada, iyo falalka galmada.
- Waxaan daryeel bixiyaasha korniinta iyo masuuliyiinta waydiin doonaa sida ay tahay xaalada dhallinta iyo inay qabaan wax walaacyo ah oo la xariira caafimaadkooda. Waxaad la hadli kartaa dhakhtarka ama daryeel bixiyaha caafimaad oo kaliya ama asagoo qolka uu kujiro wiilku/gabartu.
- Marka laga sameynaayo baaritaanka naasaha/xabadka iyo xubnaha taranka, kalkaalisada ama kaaliyaha caafimaadka ayaa qolka kula jiri doonta dhakhtarka ama daryeel bixiyaha inta lagu jiro baaritaanka.


©2022, Isbitaalka Carruurta ee Qaranka (Nationwide Children's Hospital)
Sii socda…

- Waxaan diiwaanka caafimaadka ee elektarooniga ah u dirnaa adeegga dhowritaanka ilmaha (CPS) iyo/ama hay'adaha korniinka. Marka sidaas la sameeyo, ma aruurinaysid ama soo gudbineysid foomamka.
- Dhallinta jira 13 sano iyo kuwa kasii wayn waxay si buuxda u heli doonaan diiwaanadooda caafimaadka. Ayaga ayaa soo qaadan kara natiijada baaritaanka haddii ay heli karaan MyChart®. Haddii aysan lahayn MyChart wali ayna jeclaan lahaayeen inay isticmaalaan, qof kasocda kooxdeena ayaa caawin doona.

## Xakameynta Uurka iyo Caafimaadka Galmada



**Sawirka 1 aad** Kala hadlida baaritaanka STI iyo daaweynta uu sameeyo dhakhtarka ama daryeel bixiyaha caafimaadka.

- Dhallinta waxaa loo oggol yahay inay qarsood ka dhigaan marka ay ka hadlayaan arrimaha la xariira galmada, falalka galmada, xakameynta uurka (kahortaga uurka), caabuqyada lagu kala qaado galmada (STIs), uurka illaa in waxyeelada loo geystay ayada maahee ama dad kale loo geystay.
- Sharciga Ohio iyo siyaasada Nationwide Children's Hospital waxay dhigayaan dhallinta jira 15 sano iyo kuwa kasii wayn inay qaadan karaan dhammaan noocyada lagu xakameeyo dhalmada, marka laga reebo aalada la geliyo xubinta taranka (IUD). Oggolaansho ogama baahna laanta adeegyada dhowritaanka ilmaha ama oggolaanshaha waalidka ama waalidka korinaaya.
- Dhallinta hablaha ah waxaa loo oggolaan karaa in la geliyo aalada xakameyso dhalmada sida Nexplanon®. Xarunta caafimaadka ee BC4Teens ayaa gelin karta Nexplanon maalinta balanta, si aysan dib ugu soo laaban. Waxaad heli kartaa xog dheeraad ah ama waxaad balan ka qabsan kartaa www.nationwidechildrens.org/BC4Teens. Sidoo kale waxaad wici kartaa (614) 722-6200.
- Baaritaanka STI waxaa loosoo bandhigi doonaa dhammaan dhallinta booqashada guud ee caafimaadka u yimaada. Baaritaanka STI waxaa kujira muunada dhiiga ama kaadida, suuf la geliyo xubinta taranka, ama suuf la geliyo gudaha dhuunta. Ohio waxay dadka da'doodu ka yar tahay 18 sano (ilmaha yaryar) u oggolaataa in la baaro lana daaweeyo ayadoon oggolaansho laga haysan waalidka, masuuliyiinta, ama waalidka ilmaha korinaaya.
- Natiijada waxaa loo diri doonaa dhallinta. Dhallinta ayaa go'aansan kara inay shaacitaan natiijadooda iyo in kale. Haddii ay helaan natiijo wanaagsan, waxaan ku dhiirigelinaa inay la wadaagaan natiijada lamaanahooda galmada.

## Badqabka

- Dhallinta si qarsoodi ah ayaa looga qaadaa wareysi si ay oga hadlaan ciladaha la xariirta maskaxda iyo caafimaadka hab dhaqanka sida ka fikirida inay waxyeelo u geystaan naftooda ama ay isdilaan. Haddii ay noo sheegaan inay waxyeelo isku geysan doonaan ama ay waxyeelo u geysan doonaan qof kale, ama inuu qof waxyeelo u geysanayay, xogtaan waxaa lala wadaagi doonaa dhakhtarka caafimaadka ama dhakhtarka caafimaadka dhimirka iyo laamaha sharciga ee ay khuseyso.
- Kooxdeena cilmi nafsiga ama dhibaatooyinka ayaa caawin doonaa dhallinta iyo qoyska korinaaya haddii ay jiraan walaac la xariira isdilid ama dhaqano kale oo xun.
- Waxaa jira ilo ku caawinaaya ood ku helayso guriga haddii carruurtu halis ugu jiraan inay isdilaan. Waydii kalkaalisadaada ama dhakhtarkaaga xog dheeraad ah oo ku saabsan ilahaan.

## Daryeelka Dadka waawayn

Dhakhtarku wuxuu la hadli doonaa dhallinta kujira daryeelka xigtada ah ama kan korniinka inay u wareegaan daryeelka dadka waawayjn inta lagu jiro muddada baaritaanka guud ee caafimaadka. Nidaamkaan waxaa kamid ah ka caawinta inay fahmaan taariikhdooda caafimaad iyo sida loo daryeelo dhibaatooyinka caafimaadka ee ay dareemayaan. **Waxaa laga hadli doonaa arrimahaan:**

- Waxaa la waydiin doonaa sida ugu fudud ee ay ku arki karaan dhakhtarkooda caafimaadka.
- Barida inay su'aalo waydiiyaan haddii aysan fahmin xogta uu siiyo dhakhtarkooda caafimaadka.
- Wax ka waydiinta taariikhda caafimaadkoodii hore iyo kan hadda, oo ay kujiraan in marna uu ku dhacay xasaasiyad iyo daawooyinka (kuurooyinka iyo sida ay u qaateen iyo goorta ay qaateen).
- Barida sida loo helo dhakhtarka dhallinta loo wareejiyo.
- Tusida sida loo isticmaalo diiwaankooda caafimaadka ee elektarooniga ah (MyChart) si ay u helaan xogta ayna u codsadaan balamo iyo dib u buuxinta daawooyinka.
- Dib u eegista caymiskooda caafimaadka iyo sida loo sii joogteeyo.
- Ka hadlida goobta, goorta, iyo sida loo helo daryeelka degdega ah.
- Doorashada dhakhtarka dadka waawayn ee ay aadi doonaan marka ay ka baxaan xarunteena caafimaadka.